SIDEED WAX O...

barbarinta adkenayo

L'ÉDUCATION DONNE DE LA FORCE

STARK DURCH ERZIEHUNG

Tirada qeybaha

Qeybta	Warqada
Hordhac	3
Barbarinta maxay tahay?	4
Sideed wax o barbarinta adkeyo	6
Barbarinta waxay ka midh tahay in jeceel caruurta lo mujiyo	8
Barbarinta waxay ka midh tahay in u murun dhici karo	9
Barbarinta waxay ka midh tahay in caruurta la dhageysan karo	10
Barbarinta waxay ka midh tahay in caruurta xaad lo samayo mise la tuso	11
Barbarinta waxay ka midh tahay in xooriyad caruurta la siyo	12
Barbarinta waxay ka midh tahay in dreemka la layahay caruurta la tusi karo	14
Barbarinta waxay ka midh tahay in caruurta wakhti filin lo helo	16
Barbarinta waxay ka midh tahay in caruurta la siyo dhirad	17
Talo iyo cawimo lo tale galey reeraha o quwaad leh	18

Hordhac

Wakhtiga xadirka waxay dadka marwalba hadal hayan Barbarinta. Qarkood o umada ka midh ah waxay u haystan in ay sida dhibato weyn ka jirto iyo marka tusalo ku sheego. Ku kale waxay u arkan in ay wixi arinta ku sabsan horteed babaday. Kadib dembiga waxa la sara- sida u wacantahay- Maciliminda iyo dadka o barbariyo caruurta, Walidka, dadka o siyasada ka shaqeyo, dadka o cilacada iyo tvka o lo yaqano mediaka u shaqeyo mise dunida sideydeyba. Marka lakin maxay ka waraman dadka o malin walba caruurta barbariyo? Wixi war laga hayo Barbarinta run ahan may dhibato ka jirta ? Macnahey ay ledeydahay wakhtikan o warka lagu bafiyo cilacada iyo tvka mise internetka ? Qofka ma hayn donta wixi lagu barbariyey nolas-hadisa dhan ? Macna may ku fadhidha? Iyo wax fican of fa'iido ma laga arki karo ?

Qoralkan waxan tilmam ku heli donta „ Sideed wax o Barbarinta adkeyo". Waxa lagu tala galeyo in Walidka iyo Reerka – lakin macal dadka o shaqa-doda tahay mise ayaka o rabo – caruurta so qorinayo ogeysiis la siyo sida ay xaga barbarinta u dhaqmi karan ay ku guleystan.

Sideedka wax o muhim ah o barbarinta adkeyo waxa qorey qolo o expert ku ah arinta o magalada Nürnberg jogo o Ababuul ahan ka dhigey. Uruurka o wax baro walidka o Swiserland saldigha ku leh lo yaqano Elternbildung CH wuxu marka ogolasho ka heley in u dalka Swiserland ku fideyo qoralkas.
Qolkastaba ay so qorinta caruurta dalka Swiserland ka duwan tahay melaha kale – waxa la tix geliyey wixi ka duwan – lakin wixi qoralkan ku sabsan sida o lagu guleysto barbarin o adkeysinayo caruurta xagana wey la midh tahay.

Maxay tahay Barbarinta?

Marka ugu horeyso: Barbarinta walidka kaliyey ma quseyso – lakin shicibka dhan, sababta ay tahay in ay dadweynaha shaqo ku ley yihin. Barbarinta sidayda way in ay caruurta adkeysa: sida ay noloshadoda gacantatoda ku qabsatan iyo wixi ficil ay la kulman ka hor tagi karayan, ay xidhidh qofka kale la yaylan karan marka ay waynadan, hadi ay diib u dhac timado ay la qabsadan, in ay aqbali karan qof kale in u dunida si kale u arko iyo waxyabo kale o badan. Marka ugu horeyso macnada waxa tahay in ay caruurta wixi ay nolashado u bahan yihin la siyo. Waxay u bahan yihin cunta iyo dhar, jeceel o lagu barbariyo iyo chance in ay dunida bartan. Barbarinta waxay ka midh tahay in o lay isku taxlujiyo sida ay gabdhaha iyo wilashada wax barasho u surubto. Caruurta wa in lo ogolado in ay keligood waxyaba bartan iyo waxay u bahan yihin walidka mise qof o weyn ay isku haleyn karan, sida ay wax u noqton ay mel ka midh ah gadhaan. Caruurta waxay ley yihin dad badan o tusal u ah: Walidka, dadka o xananeyo, Iskuulka, mesha o lagu tababaro mise ay caruura kale la kulman, lakin waxana ka midh ah dadka o caan ah o laga yaqan tvka mise cilacada. Waxa muhim u ah dadka weyn ay la nol yihin. Sida ay dadka so qorinayo u dhaqman aya macna weyn ku fadhidha. Walidka aya caruurtoda masul ka ah ay wajiib tahay in ay wanagoda ka war hayan. Barbarinta marka waxay macno u tahay in ay wajiibkooda ka so baxan iyo in ay xaquuq ley yihin. Sida ay caruurta xaq u lay yihin in ay nolol wanagsan lo diyariyo ay helan waxay xaq ley yihin dadka caruurta barbarinayo in u shicibka tageer filan siyo.

Sida ay walidka barbarinta o caruurtoda ku guleystan

- **waxay u bahan yihin qorshe iyo hab ficaan:** Reerka waxay u bahan yihin guri o ku filan, shaqo ay isku haleyn karan, lacag ku filan mise cawimo o lacag ah, meel ay caruurtoda lagu xananeyn karayo iyo degan u wanagsan reerka u waji furan.
- **Cawimo iyo Tageer:** Walidka xaq ay u ley yihin in wakhti gar ah nafis helan. Mar mar waxa is cawin/tageeri karo reeraha gudhahood. Midkale saxibo, dadka lay isla shaqayo, qarabo iyo dariska aya muhim ah sida ay mujiyan in ay ka war hayan xaladado, cawimo iyo talo siin karan. Hadi ay reerka xaga barbarinta caruurta ay wakhti jirto ay is cawin kareyniin, wax laga xishoda ma aha. Qeybta o xafiska dhalin yarta, dadka o walidka la taliyo, qolada o talo siyo reerka iyo qoyska is qabo marka cawin o gar ah aya idin siin karan.

Barbarinta wuxu yahay wado xise leh o noloshada ku sabsan. Wakhtiyo aya jirto ay barbarinta ay qofka dhiiq ku noqon karto, lakin waxay muhim u tahay dad weynaha o shicibka iyo wa wax lagu farxi karo. Barbarinta hadi ay caruurta adkeysi u qordhisay waxa ka fa'idayso dunida iyo caruurta aya marka ka fa'idayo dunida.

Sideed wax o Barbarinta adkeynayo

Siday aya o la garta in ay „Barbarinta caruurta adkeyneyso“? Walidka wakhtiga xadirka waxay fursad lay yihin in ay boogaag iyo waraqo ku sabsan arinta so qoriska talo ka radsadan. Anagana hada ma rabno inan qoral kale o ku sabsan barbarinta bila sabab fidino. Qolada o ka midh ah “Ababuulka Barbarinta o caruurta adkeyneso” waxay mujiin rabta sideed wax o muhim ah sida o lo garto wixi „Barbarinta adkeynayo“.

...inad caruurta jeceel sisiid

...la murma kartid

...inad dhegeysiin kartid

...inad xaad u yelshiid

...inad xoriyad fillin sisiid

...inad dareenkaga tusi kartid

...inad wakhti filan u heshid

...inad caruurta cid
la dhireyey ka midh ahado

BARBARINTA WAXA ADKAYO

BARBARINTA WAXAY TAHAY...

inad jeceelkaga sisiid

Marka ilmahaga jeceel sisiid waxay macnahayda tahay inad sidu u yahay ku ogaladiid iyo kadib dreenkaga ku cadeysiid. Caruurta iyo dhalin yarta waxay u bahan yihin dreenka o jeceel lagu barbariyey sida ay u fahman in ayka bila cabsi ogadaan wixi ay ku fican yihin iyo wixi ay weli ka maqan sida isku filnadan. Lakin mar mar way ku adag tahay hoyada iyo abayasha sida caruurtoda jeceelka siyaan. Marka siday aya caruurta lo siin kara jeceelka ?

- Sida ugu dhow waxa lagu mujiin kara caruurta in la jeceel yahay in la ag jogo, gacanta lagu hayo, la tabto. Hadi qor lo qado, si o waji furan lo eego, dhabarka lo salaxo, tartiib dhinac lo bedhiyo: Caruur walba marka wu garta waxay macnaheyda tahay.
- Caruurta markay ay si weynadan waxa marka ka fican in si kale lagu cadeyo in la jeceel yahay. Dhalin yarta – wilashada iyo gabdhaha, waxay ka helan in mar mar gacmaha lagu hayo, kolkastaba ay caruur ayaka is la ekadayn isdhunkusha ka dhexso radsadan.
- Wakhti filan lo hayo, in la tuso in interess lo hayo iyo mar mar la sasabo waxa cadeyn ilmaha u tahay in walidkisa jeceel yihiin. Waxa u sheegta caruurtada inad jeceeshahay iyo inad ka heshid sidu yahay, adigo marka eegin wuxu dadal samayey.
- Jeceel in caruurta la siyo macnahayda ma ah in walidka mise qofka o so qorinayo marna lo ogaleyn in u nasto mise caruurta waxayabo u ka helin u dido.

BARABARINTA WAXAY TAHAY...
in muranka la ogal yahay

Is khalaf reer walba wu ka dhici kara. Marka wakhtiga wax weyn ma ka jirto hadi la qeliyo. In marka "maya" la yidhado o is khalafka lo adkeysto, wixi u qofka kale o reerka ka midh ah u bahan yahay la garto, in qof kale wixi o la rabo la fahamsiyo, waxayabo rali laga noqdo, dariq o lagu heshiyo la helo: Marka o muran jiro caruurta waxay tababar ku helayan sida u dhaqmi lahayan. Muranka wa wax in la barto tahay. Sida o is khalafka dhibato weyn noqoniin o dariq lo helo, waxa muhim ah in waxyabo la tix galiyo o xaquq ah:

- Wax walba hadi o la fahimsin karayo caruurta aya laga wada hadli kara o marka in la mabnuco ma aha. Caruurta wa u fasax in ay dareen xun ay marka lay yihin, metelen cadho mise in ay qofka marka arki karin, walidkoda tusan ay sida awgeed kadib xumado laga qadiin o la dilo i.w.m.
- Dadka weyn marwalba way ka awad badan yihin caruurtoda. Sida awgeed caruurta wa inad dhortan o ka ilalisan inad hadal xun ku yedhin mise xumado kale mujiniin – waxa marka laga raba inad caruurta waxay ku sheegan si wacan u dhegeysatid o tix galisid.
- Hadi labada qof ficil weyn isu hayniin waxa muran dabadeed la ogalan kara in qof walba sidu asaga arinta u arka lagu dayo. Sida waxay caruurta iyo dadka weyn o walidka ku tabar heli donan in ay is dhowran ay dul qadan qof ka kale.
- Caruurta wa in lo ogolada in ay isla murman o kadib dadka weyn mise walidka dhaqso u dhax gelin. Lakin hadi ay qofka ay ka adag yihin xumayan waxa wanagsan in la war geliyo in ay dhworis laga codsanayo.
- Dadka weyn waxay caruurtoda tusal u yihin. Hadi ay caruurta arkan walidkoda o si ixtram leh isla hadlan mise murman waxayaba ay ka baran karan o fa'iidi donan. Caruurta way ka xumadan is khalaf hosta ka jiro, jidh dil mise hadal xun o reerka ka dhexeyo. Wakhtiga ay jiran caruurta waxay walidkoda mise dadka so qorinayo u fasiri karan wixi muran so jidey- marka in ay isku dayan in ay caruurta dhinacoda u so jediyan wa in ay iska ilaliyan.
- Sida ay muhim u tahay in lay isla murm karo waxana qasab tahay in la heshiyo. Hadi ay caruurta xoog isla murmayn waxa marka walidkoda tageer iyo talo siin karo. Hadi reerka gudhaheed lay is magey waxa u fican qoyska in ay inta ay hurda donaniin isla habeenka ugu demben heshis samayan.

BARBARINTA WAXAY TAHAY...
in qofki la dhageysan karo

Qof in la dhageysto waxay tahay inad si fican u dhugasho sisiid iyo wuxu icdi codsadey tix galisiid.Dhalin yarda malin walba wax cusub aya la kulman sida waxay u bahan yihiin in ay dadka weyn o so qorinayo si wanagsan u dhageystan. Reer walba malinta wakhti gar ah way in ay surtagal noqota in ay wada shekaystan – may noqoto shir o reerka u dhaxeeso mise galab kasta la wada casheyo mise marka o caruurta la saxiinayo. Qofki in la dhageysto wax adag aya ahan karta. Marka waxa ku cawin karo:

- Mar marka wixi qofka sheegi rabo ugu dambeen ayu warka u hayo dhiba o horteed laga filaniin. Sida daredeed: Qofka kale sug ila inta u jawabtisa dhameyey!
- Wixi adiga marka si deg deg hadal ku celisid mise isla marki talo bixisiid qofka ma cawineyso. Caruurta waxay garanayan in si wanagsan lo dhageysto markay ay walidka isku dayan in ay xallilaad u helan dhibato jirtey.
- Sida o is af garasho la'aan u dhaciin waxa la hubiya in wixi la sheegay icd walba fahmay.
- Hadal wanagsan o walidka iyo caruurtoda ka dhaxeyo waxayabo kale o ka jedin laha ma u ficno. Sida marka TVka baxtiya iyo tilifonka la so garaco ha qabaniin!
- Hadi ay caruurta si gar ah ugu jawab dhiban waxay la kulmayn – marka waxa fursad leydahay hadi ay si kale ku jojiin karin hadalkoda o dhaman laheen inad dhax gashiid. Caruurta o sidooda iska amusan, wax la dhiri la galiya in ay ka jawaban wixi ay la kulmayn.

BARBARINTA WAXAY TAHAY...
inad caruurta xaad u sameysiid

Wixi o xaad lo sameyey caruurta in ay walidka ilaliyan iyo gadh ka hayan qarqood way ku adag tahay lakin walid badan ayey wajibkooda ugu muhimsan, qar kalena awooddoda la tijaabiyey u tahay xaga Barbarinta. Caruurta iyo dhalin yarta waxay yihin dad u dhashey, in ay samirka iyo qartida o walidka tijaabiyan. Caruurta waxay u bahan yihin xaad lo sameyey madamo labo sabab awgeed: Sida ay halista jirto guriga gudhahisa iyo dabeeda daradeed laga ilaliyo. Midakale xaad o xaquuq o macna ku fadhidho lo samayo ilmaha marka wuxu dareen ku ley yahay in ay nabad jirto. Mar mar dadka o hanaqaadka ah way ku adag tahay in ay ka so horjeedsadan wixi ay caruurtoda donayan. Lakin hadi ay walidka marwalba ilkahoda cadeyadaan waxay tusal u yihiin caruurtoda. Markana xaquuq o lagu dhaqmo aya fican:

- Xaadka lo sameyey caruurta wa in toos lo garta. Dadka o hanaqaadka way in ay horteed si wacan ugu fikaran sababta ay sadaro is barbar socda samayen. Caruurta yara weyn waxay fahman wixi lo didey misa lo mabnucay hadi ay dadka hanaqaadka si fican u fasiraan sababaha.
- Qofki o xad u sameyey caruurtisa marka waxa asagana wajib saran sida in u ku dhaqmo. Ta macnahayda ma aha in ay hoyada mise abaha wakhtiga ay caruurta seexdan in ay hurda donta. Lakin marwalba hadi ay walidka cadeyka isticmalan waxay u yihin caruurtoda tusal.
- Hadi o xad lo sameyey caruurta o kadib la ilaliniin in ay sida lagu hashiyey lagu dhaqmiin kadib arinta macno ma ku fadhidho. Hadi o si wanagsan shiriqad la tuso waxay tahay wax lay isku haleyn karo iyo caruurta waxay dareen ku helayan in la fahmay.
- Hadi u ilmaha sadaro is barbar socda la sameyey ku xad gudbo dadka o hanaqaadka wa in ay isku midh u dhaqman o isku af ku hadlan. Caruurta waxay la qabsan karan hadi ay sadaro is barbar socda ay hoyada, abaha iyo dadka kale o ka qeyb galo is Barbaarinta isku midh yihin – kolkasbabo qof walba si gar ah ilmaha u so qoriyo. Mar mar ma ku filno in si xoog lo mujiyo in "mayo" lo jeedo mise digniin la bixiyey. Hadi o daq daqaq o shiriqad ah lo bahanyahay marka wa in caruurta isla marki wixi o jiro laga wada hadla. Caruurta way fahman wixi o ciqab o macno ku fadhidho lagu sameyo.
- Waxa mabnuc ah faraxumeyn kastabo mise jidh dil. Marka jidh dil kaliyey ma aha lakin qalbi dil – metelen in ilmaha jeceel la siin wayo. Sadaro is barbar socda la sameyey in laga il baxo way iman karta.
- Sadaro is barbar socda lay iska dayey ay sabab lo arko in ay macno ku fadhiniin, mise wakhtiga is bedeley – macnahayda ma aha in Barbaarinta sida u dhamatay. Caruurta iyo dhalin yarta isla marki ixtramka ay walidkooda u hayan ma ka lumayso hadi ay habeenki wakhti dheerad so jeedi karan.

BARBAARINTA WAXAY TAHAY...
in caruurta xoriyad filan la siyo

Caruurta waxay u bahan yihin in xoriyad ku filan la siyo, sida ay kaligood u qorshayn karan. Marka u ilmaha hal sano gadho wuxu u bahan yahay in xoriyada ku filan la siyo. Caruurta marka waxa sanadkasto wax ku kordhayo – metelen in ay kaligood wax cuni karan, kaligoog musqul kori karan, wakhti gar ah in ay walidkooda ka maqnadan, kadib lacag la siyo kaligood wax ku ibsado iyo waxyabo kale o badan. Xoriyad ku filan caruurta waxay muhim u tahay sida ay kadib marka ay waynadeyn kaligood isku filnadan iyo masulnimo qadan o nolashado ku guleystan. Sida ay walidka ay u gartan wakhtiga ay xoriyada siin lahayeyn mise ka war hayan caruurtooda waxa ogada:

- Xoriyada o la siyo caruurta wa in ay tujabiyaan. Hablaha iyo Wilashada o wixi reerka shaqo u talo laga qeyb galiyo waxay kadib noloshadooda u bahan yihin ku bartan. Qofka o hoyadisa mise abahisa marwalba ag jogey marka u guriga ka shaqeynayo wuxu kadib mar dhow kaligisa mapka o magalada akhrin kara mise baskeel isku rakibi kara.
- Caruurta tartiib aya xoriyada la siyo u bartan in ay ku dhaqman. Ilmaha o weli dugsiga hose dhiganayo waxay halki isbuuc kasto lacag gacanta laga siin kara, dhalin yarda waxay masul ka noqon karan accounka o bankiga ay ku ley yihin, xaga aya walidka u dhigi karan lacag ay alabo ay iskuulka iyo dhar ku so ibsan karan.
- Tageer aya caruurta raban markey xoryada la siyeyey isku dayan in ay tujabiyan. Tilifonka o gacanta mise kardhka o tilifonka hadi ay caruurta haystan kadib marka ay gabadha o 11 jiir ah kaligeed saxiibteed o xafad kale degan so boqon rabto waxay walidkayda war warka ka yaran kara – ayadana safarka dhib weyn ma u arkeyso.
- Marka ay noqoto wixi o fashionka ku sabsan facda o kale jaad ah marwalba ma isku racsan. Hadi ay noqoto wakhti is dhafinta, sida timaha lo hagayiyo mise ku sabsan asxabto la raco- marka wa in caruurta lo ogalada in ayaka dortaan wixi ay ka helan – hadi o sadaro is barbar socda ay walidka samayeyn lagu xad gudbin. Waxakastaba ma lo dulqadan karo ay caruurta raban hadi ay cafimadkoda wax u geseyn karto. Hadi ay dhalin yarda bilaban in ay cigar caban ma u wanagsano so qoritankoda.
- Wakhtiga o baysalka qofnimo waxay dhalin yarda inta badan walidkooda ka codsadan in ay xoriyad badan helan, macal caruurta o marka wax badan rabin waxay dhib badan ula iman karan walidkooda ayna aqbalin wixi lo sheego. Sida ay caruurta marka u ambaniin waxay u bahan yihin hablaha iyo wilashada whaktigas in ay waya arag helan in ay xoriyad bila xad jirin. Hadana walidka wa in ay dhalin yarda ku cawiyan in ay dariqoda kaligood maran sida ay qof hanaqaad u noqon karayan.

BARBAARINTA WAXAY TAHAY...
in caruurta dareen la tuso

Jeceel iyo Farxad, Murugo, Xanuun iyo Cadho- Dreenka wa wax o nolashada o reerka ka midh ah. Caruurta waxay si kala jaad dreenkooda u tusan. Inta o caruur jirto o qofka ay jeceel yihin aad aya ugu so dhawadan ay raban in sida ku mujiyan, qar kale waxay sawir gacantoda ugu samayan icda ay jeceel u hayan. Caruurta xaga so qoritankooda waxa muhim ah in ay gartan dareenka iyo sida ay marka u dhaqman. Marka wax la ogada:

- Caruurta wa u fasax in ay dareenkooda tusan, wixi wacan iyo wixi xuun. Iyo caruur kastabo wuxu sida u rabo dareenkisa ku sheegi kara metelen asago qeylinayo mise asago amusan. Wakhtiga lo didi jirey in ay wilishada ohiin ka timado iyo hablaha ay mabnuc u ahan jirtey in ay isla legdaman way dhamatay.
- Mar mar dadka o hanaqadka ah dareenka ay caruurta mujiyaan waxay u arki karan in xad laheyn. Marka waxa ilmaha laga codsan kara in ay is celis yeshan. Lakin wa in la war geliya in dareenkooda waxba laga qabiin o sida ay u dhaqmayan la ogaleyn.
- Caruurta waxay raban in dareenka ay leh yihin la fahmo. Dhibatoyiinka yar iyo ku aad u weyn sida dadka hanaqadka qiyas mu u hayan si kale ayey u arkan. Marka waxa fican in samir lo yesho.
- Qarkood o wilishada iyo gabdhaha wixi ay mashquul ku yihin icd kale ma u sheegan. Ayaka waxay yihin si gooni o amusan mise u eeg in ay dhibato hayso, marka walidkooda way in a radka radiyan waxa u wacan. Macal caruurta o amusan o wax badan hadlin waxay u bahan yihin in ay qof la hadlan una sheegan waxay mashquul ay ku noqtayn.
- Waxay caruurta marka macal baran donan sida ay dadka o hanaqadka dareenkooda yahay. Marka walidka way tusi karan caruurtooda dareenka ay leh yihiin iyo sida o ilmaha u fahmi karo u fasiran. Wax o jirin koley ma lagu akhrin karo. Caruurta waxa cabsi galo hadi ay dhibato jirto laga wada hadlin ay walidka ka qariyaan arimo kale. Walidka sida caruurta waxa ku dhaci karo in cadho weyn hayso ay is celin kareyniin. Kadib marka waxa muhim ah in la rali galiyo icdi o lo cadheysna.
  Khalad o la qirtey ma aha dacifnimo!

BARBAARINTA WAXAY TAHAY...
in caruurta wakhti filan lo hayo

Ciyaro, Hadal, Akhris, dunida in la sahmiyo – Caruurta waxay wax badan baranayan marka ay reerka wax isla qabtan o futurka u wanagsan. Iyo wakhti ay walidka iyo caruurta wada qeybsadeyn waxay adkeneysa xhididhkooda. Caruur iyo dhalin yar badan waxa donayan in ay walidkooda wakhti dheerad u helan. Sida ayey u surubi karta:

- Wakhti in la haysto ma ku xhidhno in waxayabo qali la sameyo. Hadi o dabal la tago, mesha o xawayanka lagu xananeyo mise baskeel reerka dhan isu wada racan waxa aad ugu helo caruurta. Madadalis o qeybsan qoyska waxay tahay chance in wakhtiga o firaca ah lay isla kulmo wax la wada qabto.
- Caruurta malin walba ayey wakhti filan u bahan yihin iyo in si wanagsan laga war hayo. Marka waxa la wada shaqeyn kara ayado ay isla marki wax o madadalis ahan la qabanayo metelen guriga in laga shaqeyo – hadi o wax o dhib laga dhigiin. Reero kale waxay iska ilaliyan in ay Tvka mise Playstationka iska baxtiyan sida wakhti filan isu helan. Sacadaha o sida lo helo wixi fakirad wanagsan aya lo isticmali kara.
- Walidka marka caruurtooda waxay isku taxlujiin karan ayaka o iskuulka ku cawinayo mise basqeelka o jabey in ay u hagajiyan. Habeenki waxay u akhrin karan buug kolkastaba wakhti filan lo bahan yahay – lakin caruurta aya muhim u tahay.
- Walidka o wakhti badan shaqada awgeed u hayniin caruurtooda in ay ka xumadan ma aha. Waxa muhim ah in ay wakhtiga ay u helan reerka si wanagsan u isticmalan. Hadi o wakhtiga aad u yar yahay waxa cawin karo qarabaha o ka midh ah habar yaro, edoyiin, ayeyo, awowe mise saxibo.

BARBAARINTA WAXAY TAHAY...
in cararuurta dhirad la geliyo

Wixi o cuseeb ah, wixi ay baran donan iyo wajibyada ay qadan donan, waxay dhalin yarda u bahan yihin in badan u gesinimo iyo calsoni ah. Marka waxay baran donan in ay masulnimadoda qatan iyo gul ku helan iyo si dhaqso lo jebin kareyniin. Sida ay gesinamo iyo calsoni u helan waxay hablaha iyo wilishada u bahan yihin labo wax: Mabsud in ay ku ahadan wixi ay haystan iyo in la tix galiyo wixi ila hada kareyn. Siday ay walidka caruurtooda dhirad gelin karan ?

- Caruurta waxay donayan in qof ahan lo jeclado iyo lagu qiyas qadiin wixi kari karan. Sida o dhaxso lo dhirad la gelin karo aya caruurta hadana calsonidooda la yareen kara. Sida awgeed dadka hanaqadka wa in ay si wanagsan u dhoran.
- Qofka o dhiran rabo wuxu u bahan yahay in u gul heley. Hadi ay caruurta wax isku dayan iyo marka qalad samayn karan waxay diyar u yihin in ay wax yar o so gadhi karo o xagdiin i.w.m. Marka hadi ay wax lo diro iyo musal qadi karayan waxay ku heli karan dhirad.
- Caruurta waxay u bahan yihin amaan. Marwalba kaliya in wixi ay caruurta sameyeyn in la eego ma aha, mar mar waxa dadalka u qadey ilmaha la amani kara. Amaanta wa in si o qiyasaan lo isticmala, hadi kale macno ma ku fadhidho, hadi ay noqoto in ay waxyabo gar ahan jirto in la mujiyo.
- Cawimo o la siyo caruurta waxa marka laga marmi kara in u ilmaha xumado dareen sideyda yesho hadi kali wax sameyn karin. Marka o dhar la so ibiin rabo waxa u diyarisa wuxu kaligisa gashan karo.
- Xagana wax la ogada: Dadka o hanaqadka o caruurta u ogal in ay qalad sameyn karan – waxay ayakana u banantahay in ay qalad sameyn karan.

Talo iyo cawimo lo tala galey reeraha o xoog leh

Qofna ma aho iyo in noqoto ma ah „maqinad wax barbaariso". Abaha o qalad laheyn mise Hoyada o dhib laheyn waxay caruurta balayo ku noqon laheyd. Sida daradeed ugu dembeen waxa rajanayna in dhirad reerka o qalado leh lo hayo. Walidkastaba aya xad la kulmo marka ay caruurta so qorinayan. Marka waxay u bahan yihin qof dhageysto, dhirad geliyo iyo xooriyad siyo.

- Waxad ogolada in aad sheegtiid marka o xoogaka yaratay. Ma aha wax laga xishodo, lakin talabo o dhirad leh.
- Wakhti kugu filan fasax ka qado Barbaarista o caruurta. Mar mar waxa kali filan tahay in dhowr sacadood sitimaanka heshid – adiga o wadaniin caruurta, sida kaliga dabal tagi kartiid, mise luqad la barto ka qayb gali kartiid mise inad saxibo so boqotiid. Iyo inad wax isla qabsatiin qoys ahan, sida waxa ka fa'idayo reerka dhaan.
- Hadi aad tageer u bahan tahay sheeg. Dariis, Qarabo mise saxibo, macal xafiska o reerka la taliyo a cawimo bixin karo.

Waxan rajaynayna " Ababuulka o Barbaarinta o caruurta adkeyneso" in ay cawimo ku ahan karto marka o wajibka ku saran ka so bixi rabtiid. Waxa kale rabna in "sideedka waxa Barbaarinta xoog siyo" u qornino: fikarad o maqul ah iyo waji furan. Sida aya malin walba o la so qorinayo caruurta lo qorshayn kara

L'ÉDUCATION DONNE DE LA FORCE

STARK DURCH ERZIEHUNG

FCV·VWG

Fédération des Communes Valaisannes
Verband Walliser Gemeinden

FRAPE VS

Fédération Romande des Associations de Parents d'Elèves du Valais

Pour vous - chez vous
Überall für alle

CMS-SMZ

Valais Wallis

KITA WALLIS
ENFANCE VALAIS

Walliser Verein der Verantwortlichen der Institutionen für Kinderbetreuung
Association Valaisanne des Directeurs-trices d'Insitutions Pré et Para Scolaires

PRO JUVENTUTE VALAIS ROMAND

JUGENDARBEITSSTELLE OBERWALLIS

ADDICTION | VALAIS
SUCHT | WALLIS

GPV	Groupement des Pédiatres Valaisans
VWK	Vereinigung der Walliser Kinderärzte

CANTON DU VALAIS
KANTON WALLIS

www.vs.ch/web/scj/edf